

Gudniinta Raga

Male Circumcision

A circumcision is the removal of the piece of skin, called the foreskin, from around the end of the penis, called the glans. This is an elective procedure or surgery, which means you decide if you want to have it done.

If you decide to have a circumcision for your son, it is done in the hospital nursery by your baby's doctor before your baby goes home.

Gudniinku waa goynta qayb kamid ah maqaarka, oo loo yaqaan maqaarka hore, oo ah qayta hore ee guska, oo loo yaqaan buuryada. Tani waa hab ama qaliin koronto, oo micnaheedu yahay waa inaad go'aansato inaad dooneyso iyo in kale.

Haddii aad go'aansatid in cunugaaga la gudo, waxaa sameynaaya kalkaalisada isbitaalka ee dhaqtarkaga ilmahaaga kahor inta ilmahaagu aadin guriga.

How Circumcision is Done

The procedure takes about 15 minutes.

The doctor uses a numbing medicine, so the baby feels little pain.

A metal clamp is used around the penis and a piece of it, called the bell, is slipped under the foreskin to protect the end of the penis. The skin is cut around the bell and removed, so the end of the penis can be seen.

The penis may be wrapped in Vaseline gauze. If needed, special gauze or stitches are used for bleeding.

Guska aan Gudneyn
Uncircumcised Penis

Maqaarka
Hore
Foreskin



Guska aan Gudneyn
Circumcised Penis

Afka hore ee guska
Glans



Sida Gudniinka loo Sameeyo

Qaliinku waxa uu qaataa 15 daqiiqo. Dhaqtarku waxa uu isticmaalaa daawada dareen la'aanta, si ilmuhu u dareemo xanuun yar.

Bir ayaa lagu qabtaa aagaga guska iyo qayb kamid ah, oo loo yaqaan beelka, si loosoo siibo

buuryada loona ilaaliyo qaybta kale ee guska. Maqaarka birta udhaw ayaa la jaraa, si loo arko qaybta ugu danbeysa ee guska.

Guska waxaa lagu duubi karaa faashad Fasaliin leh. Haddii loo baahdo, faashad gaar ah ama tolmo ayaa loo isticmaali karaa dhiigbaxa.

After the circumcision

- Your baby will be checked for bleeding for about an hour after the procedure.
- Many babies sleep for the first few hours, but try to wake him to feed.
- He may seem uncomfortable when urinating after the numbing medicine has worn off. Holding and swaddling will often soothe him.
- Swelling in the area will go away in 4 or 5 days.

Care at home

- Keep your baby off of his stomach for the first few days.
- Keep the area clean and dry.
- Use warm water only when washing, with no soap. Gently pat dry.
- With each diaper change for the next 7 days or until the penis is healed:
- Wash your hands before and after.
- Do not use diaper wipes directly on the penis. The alcohol in them can sting.
- Do not try to remove the crust that forms on the wound. It is a part of healing.
- Apply Vaseline to the end of the penis until it is healed.

Gudniinka Kadib

- Cunugaaga waxaa la fiirin doonaa hal saac kadib bal inuu dhiigbaxaayo kadib qaliinka.
- Carruur badan ayaa seexda inta lagu jiro dhowrka saac ee hore, laakiin iskuday inaad kiciso si aad wax cunto u siiso.
- Waxaa laga yabaa inuusan dareemin raaxo marka uu kaadinaayo kadib marka daawada kabuubyada ay jirkiisa ka baxdo. Qabashada iyo kolkoolinta ayaa badanaa dejisa.
- Bararka meesha waxa uu dhamaanayaa 4 ama 5 maalmood.

Daryeelka guriga

- Cunugaaga ha u seexin caloosha dhowrka bari ee ugu horeysa.
- Meesha ha noqoto nadiif iyo qalayl.
- Isticmaal biyo qandac ah kaliya marka aad u qubeynayso, oo aan lahayn saabuun. Si tartiib ah u qalaji.
- Ayadoo xafaayad kasta laga bedelayaa 7 dii maalin ee xigta ama illaa guska ka buskoonayo:
- Dhaq gacmahaaga kahor iyo kadib.
- Tirtirada xaafayada ah si toos ah ha u isticmaalin guska. Aalkoolada kujirta ayaa gaari karta.
- Ha iskudayin inaad fujiso qolafka meesha dhaawaca ah saarmatay. Waa qayb kamid ah buskoshada.
- Mari Faasaliin afka hore ee guska illaa uu ka buskoonayo.

Call your baby's doctor if you notice:

- More than a few drops of blood on the penis or if the diaper has a spot of blood larger than an inch across.
- No wet diapers or very few within 12 hours of the circumcision.
- Signs of infection, like redness, swelling, pus draining from the area, foul odor or fever.

Wac dhakhtarka ilmahaaga haddii aad dareento:

- Wax ka badan dhowr dhibcood oo dhiig ah oo kasoo daadanaaya guska ama haddii xafaayadu soo noogtay dhiig ka badan dhowr inji.
- In xafaayadu qoyin ama wax yar qoydo 12 saac kadib gudniinka.
- Calaamado caabuq, sida casaan, barar, malax ka imaata meesha, ur xun ama qandho.